

weligii marnaba arag kibis qamadi wanaagsan laga sameeyay oo buunsho baxsan tan iyo markii Alle soo diray ilaa markuu dhintay. Waxaa la waydiiyay: oo ma waydnaan laheyn Xaarinnu waqtigii Nabiga (S.C.W.). si aad u soo saartaan daqiiqda, Burka wanaagsan. Wuxuu yiri: tan iyo markuu Alle soo diray ilaa markuu oofsaday Nabiga (S.C.W.). marnaba ma arag Xaarin. waxaa la sii waydiiyay: oo sidee u cuni jirteen Rooti iyo bur laga sameeyay qamadi aan buunsho baxsaneyn? Wuxuu ku jawaabay: waan shiidi jirnay dabadeedna buunshaha ayaan uga saari jirnay Afuuf. Sidaa ayaana buunshadu ku duuli jirtay, miraha shiidan ee halkaas ku harana, gacanta ayaa lagu tumi jiray inta la qooyo si loo cajiimeeyo' **(Bukhaari).Abuu Hurayrah (A.K.R.). wuxuu yiri: Nabigaa (S.C.W.).** soo baxay maalin ama habeen ayay ahayd markuu Abuu Bakar iyo Cumar oo meel jooga ku yimid. Wuxuu waydiiyay: maxaa idinka soo saaray guryihiinnii saacaddaan? Markaaseey yiraahdeen: Rasuul Alloow gaajo. Isaguna wuxuu yiri: Alle baan ku dhaartay kan ay ku jirto gacantiisa Nolosheyda, taas idin soo saartay ayaa anigana isoo saartay. Ee bal ina keena. Abuu Bakar iyo Cumar waa kaceen seddexdoodiina waxay u tageen guriga nin Ansaarta ka mid ah. Mase waa ka maqanyahay gurigiisa. Markay haweentiisi aragtay Nabiga (S.C.W.). ayay tiri: soo dhawaada, soo dhawaada. Nabigu (S.C.W.). wuxuu waydiiyay: aaway hebl? Waxay tiri: wuxuu inoo raadshay biyo saafi ah oo macaan. Markaasuu yimid. Markuu arkay Nabigii (S.C.W.). iyo labadiisii rafiig ayuu yiri: Alxamdulillaahiye maanta qof iga marti fiican ma jiro. oo inta dhaqaaqay gacan Timir ah u keenay martidiisa sharafta badneyd kana codsaday inay cunaan. Dabadeedna middi soo qaaday si uu ugu gowraco neef ari ay ku casheeyaan martida. Nabigu (S.C.W.). wuxuu yiri: wixii irmaan iska jir: markaasuu Ri'u gowracay aan irmaaneyn martidii Sharafta laheyd iyaguna cuneen hilibkii Rida, iyo Timirtii, biyo wanaagsan oo saafi maacaan ahna cabeen. Markii ay wax cuneen ilaa ay ka dhergeen oo la wanaajiyay, biyo maacanna cabeen ayuu ku yiri: Nabigu (S.C.W.). labadiisi saaxib. Nafteyda kan ay gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye, maalinta qiyaame waa la idin waydiinayaa nicmadahaan iyo galladahaan Alle. Waa idin ka soo saaray guryihiinnii gaajo, intaydaanse u noqon guryihiinnii waxaad ku raaxaysateen barwaaqadaan.' **(Muslim).Halkaas ayaan ku joojinaa maadaama mowduucaanu aad u dheeryahay Qur'aanka iyo Sunnadana inbadan looga hadlay. Haddii Eebbe idmo jimcada xigta ayaan kusoo qaadan doonaa!Axaadiista aan kusoo qaatay waxaan kasoo xigtay Kutubka Riyaalus-saaliniin "Beertii Suubbanayaasha" tirsigooduna waa kan: (491, 492, 493, 494, 495, 496, 497) JIMCO SUUBBAN! W/D/ Xasan Cabdulle Calasow ?Shiribmaal?**